

# Joojinta tallaabooyinka aageed ee degmooyinka Viken

Dawladdu waxa ay go'aamisay in ay joojiso tallaabooyinka aageed ee degmooyinka gobolka Viken. Isbeddelka ku yimi xaaladda faafidda cudurka ayaa saamaxaya in degmooyinku hadda u wareegi karaan ku dhaqanka xeerarka iyo talooyinka heerka qaran ah. Wax-ka-beddelladani waxa ay dhaqangal noqonayaan saqda dhewe, habeenda arbaca 26-ka May.

– Isbeddelkii wanaagsanaa ee xaaladda faafidda cudurka gobolka Viken halkii ayuu ka sii socday. Kaddiib talooyin ka yimi Agaasinka Caafimaadka iyo Machadka Caafimaadka Dadweynaha waxa dawladdu go'aamisay in ay joojiso tallaabooyinkii aageed. Wixii hadda ka dambeeya degmo kasta iyada ayaa u madaxbannaan in ay soo rogayso tallaabooyin u gaar ah oo u sii dheer kuwa heerka qaran ah. Degmooyinka qaarkood ayaa durba ansixiyay ama ku dhow in ay ansixiyaan tallaabooyinkaas heerka degmo ah, ayuu yidhi Bent Høie oo ah wasiirka caafimaadka iyo daryeelka.

Degmooyinkan soo socda ayaa ka baxaya tallaabooyinka heerka B (heer tallaabooyin oo adag) laga bilaabo arbaca 26-ka May:

- Lørenskog
- Ullensaker

Degmooyinkan soo socda ayaa ka baxaya tallaabooyinka heerka C (heer tallaabooyin oo xoogaa adag) laga bilaabo arbaca 26-ka May:

- Lillestrøm
- Nordre Follo

- Rælingen
- Ås